# Maxuu baaritaanku ama screeninka sanadlaha ahi muhiim u yahay in la maro?

Cudarkan Cervical cancerka ayaa lagaga hortagi karaa isbaaritaanka iyo inla barto waxyaabaha keeni kara inta uusan qofka ku dhicin cudurkaan. Hadii qof laga helo cudurkan cerivical cancerka ah, waxaa fiican in qofka laga daweeyo inta uu yar yahay. Tusaale ahaan, dawaynta cervical cancerka ayaa isbadal ku sameeya xubinta taranka, isbedelkaas oo sababi kara in dhibaato ku timaato qorka uurka leh.



# Sidee ayaa loo daaweeyaa Cervical Cancerka?

Sida loo daweeyo cancerka ayaa ku xiran qofka caafimaadkiisa, xaalada ama marxalada uu marayo cancerkiisa, iyo talooyinka ay dhaqaatiirtu siiyaan qofka xanuunka qaba. Dawaynta macquulka ah ee lagu daweeyo qofka cancerka qaba yaa ah, qaliin, chemotherapy, radiation iyo dawoooyinka la qaato.



# Maxay Dadku samayn karaan is ay u yareeyaan qatarta Cervical Cancerka?

Qofka qaldkiisa ma ahan in uu cervical cancerku ku dhaco. Waxa ugu fiican ama sida ugu wanaagsan ee lagu yareeyo qatarta cervical cancerka waa in la is baaro markasta waayo, waxay dhaqaatiirtu arki karaan cudurkan in ta uu yaryahay ee uusan kugu faafin. Baaritaanka ayaa lagu ogaan karaa caabuqa ama viruska/germska jirkaaga ku jira ee sababa cancerka. Waxaa kaloo dhaqaatiirtu sheegaan in uu qofku ku dadaalo caafimaadkiisa oo uu ka fogaado tubaakada ama cigarka iyo ka hortaga waxyaabaha caafimaad darada kuu keeni kara ee aad ku yarayn karto in uu cervical cancer kugu dhaco.





# Baaritaan lacagla'aan ah

Hadii aad doonasid in lagaa baaro cervical cancer, wac Sage Clinic 1-888-643-2584 ama la xariir dhaqtarkaaga.



WellShare
Community Health Works!